Adeegga Xasilinta (dejinta) Qoyska (FSS)

Family Stabilization Services (FSS)

Waa maxay FSS ku?

Waxaa jira barnaamij caawimi kara qoysaska ku jira MFIP iyo DWP ee ku dhibban siddi ay shaqo u heli lahaayeen ama shaqada ay hayaan u xejisan lahaayeen. Degmooyinku waa in ay caawinaan qoysaskaas iyagoo siinaya barnaamijka AdeeggaXasilinta Qoyska.

Maxay tahay wanaaga ku jira barnaamijka FSS?

- Waxaad heli kartaa adeegyo ka caawimi kara qoyska si ay u helaan xasilooni dheraad ah.
- Waxaad ka heli kartaa qorshe shaqo oo dib u habayn lagu sameeyay. Qorshaha dib loo habeeyay waxaa laga yaabaa in aad ka hesho shaqooyin dhowr ah ama saacado shaqo doonis ah iyo waqti aad ku tagto ballamada daruuriga ah iyo kullanka baxnaaninta.
- addeegu wuxuu kaa caawin karaa in aad ka badbaado ciqaab (cunaqabatayn).

Yaa fulin kara shuruudaha Adeegga Xasilinta Qoyska (FSS)?

Waxaad buuxisay shuruudaha FSS haddii aad la timaado mid kasta oo ka mid ah arrimaha soo socda:



- **Waxaad dalbatay SSI ama Gargaarka Caymiska Bulshada sababta oo ah waxaad tahay curyaan.** Waa in aad caddayn kala timaadaa Xafiiska Cayminta Bulshada.

- **Waa in aad jirrantahy, ama dhaawacantahay, ama aad tahay curyaan.** Tani waxay isugu jirtaa xanuun jirka ah ama maskaxda ah. Waa in aad caddayn kala timaadaa Dakhtarka oo sheegaysa:
  - Xanuunkaaga, dhaawaca ku gaaray, ama curyaannimo qaadanaysa muddo ka badan 30 maalmood **iyo**
  - Kaa reebaysa in aad shaqayso 20 saacadood iyo ka badan todobaadkii.

- **Waxaad xanaanaysa qof aad u xanuunsan ama curyaan ah oo ka mid ah dadka guriga kula deggan.** Ka keen caddayn dhakhtarka waxyaabaha soo socda:
  - In qofku jirran yahay ama curyaan yahay
  - In xaaladdaasi ay qaadanayso wax ka badan 30 maalmood.
  - Waa in aad u baahantahay in aad guriga joogto si aad u xanaanayso qofkaas.

- **Waxaa jira Ilmo yar ama qof weyn oo qoyskaaga ka mid ah oo buuxiyay shuruudihii uu ku heli lahaa adeeg caafimaad oo gaar ah.** Tusaale, waxaad haysaa ilmo si daran oo qiira leh shucuurtiisu u qasanto, ama qof weyn oo uu maskaxda ka hayo xanuun halis ah oo joogta ah, ama qof buuxiyay shuruudihii lagu heli lahaa PCA ama qof laga dhaafay shuruudaha lagu helo addeegyada.

- **Waxaad tahay dhibane rabshado dhacay.** Fiiri bogga xogta aruursan, *Banaamijka MFIP iyo FSS ee dhibanaha rabshadaha qoyska*.

- **Waxaad Ameerika joogtay wax ka yar 12 bilood ka dib bishii aad soo gashay.**

- **Waxaad jirtaa 60 sano ama ka badan.**

- **Waxaa ku haysta dhibaato wax qoris ama akhris la'aan,** kuma hadli kartid ama ma garran kartid Ingiriis, waxaa ku haysta dhibaato la xiriirta maandooriye iyo khamri, ama waxaad leedahay diiwaan dambiyeed, ama khabiir xirfadeed ayaa caddeeyay in aadan shaqayn Karin 20 saac ama wax ka badan todobaadkii. Arrimahaas waxaa sabab u noqon kara kuma hadashid, ama ma fahmi kartid Ingiriiska, waxaa dhib kaa haystaa maandooriye iyo khamri, ama diiwaan dambiyeed. Waydii la taliye xagga shaqada ah si uu kuugu diro khabiir xirfadeed**.**

- **Waxba ma barran kartid, ama waxaad leedahay IQ (imtixaanka caqliga) oo ka hooseeya 80,** Tani waxay xadidaysaa nooca shaqo ee aad qaban karto oo kaa dhigaysa in aadan shaqayn karin 20 saac ama wax ka badan todobaadkii. Waydii la taliyaha xagga shaqada si uu kuugu diro khabiir xirfadeed ku tijaabiya.

- **Waxaad qaadanaysay MFIP in ka badan 60 bilood sababtoo ah waxaa lagu siiyay waqti dheeraad.**

Sidii u helaa FSS?

Haddii aad u malaynayso in aad buuxin kartid shuruudaha FSS, u sheeg la taliyahaaga shaqada. La taliyahaaga shaqadu wuxuu kuu sheegayaa waxa xiga ee aad samayn lahayd . Haddii uu kuu sheegi waayo, la hadal horjoogaha la ltaliyahaaga shaqada

Ma u baahnahay nooc qorshe qorran haddii aan ku jiro barnaamijka FSS?

Waxaad u baahantahay in aad la kulanto la taliye shaqo si aad u samaysatid qorshe FSS. Qorshaha FSS waa in ay ku jirtaa waxqabadka (dhaqdhaqaaqa) aad u baahantahay sidii aad u caawimi lahayd qoyskaaga. Tusaale, waxaa ku jiri kara fasalada ESL ama GED, ballamada dhakhtarka, raadinta guriga iwm. Waa in aad heli kartaa caawimaad xagga gaadiidka iyo kharajka xanaanaynta caruurta oo kuu saamaxaysa in aad ka qayb qaadato waqabbadka FSS.

Ma u soo beddelan karaa FSS haddii xayirrad (cunaqabatayn) I saarantahay.Can I transfer to FSS if I am in sanction?

Qoysas badan oo xiyiraad la saaray way ku jiri karaan FSS. Khasab ma aha in aad ka baxday xayiraada si aad ugu beddelatid FSS.

Ma heli karaa in xayiraadda la iga qaado?

Qoysas badan way ka bixi karaan xayiraadda haddii ay la kulmaan la taliyahooda FSS. Waxaa kaloo suragal ah in aad ka baxdo xayiraaadi bilihii hore haddi aad la timaado sabad wanaagsan. Sabab wanaagsan waxaa ka mid ah xanuun kugu dhacay, adoo waayay xanaanaynta caruurta iyo gaadiidka, arrimo deg-deg ah, qalalaase qoyska ka dhex dhacay, ama sababo kale oo kuu diiday in aad hirgeliso qorshakaaga shaqo. Haddii aad u malaynaysid in aad hesho FSS aadna ku howlantahay sidii aad u heli lahayd caddayn in aad buuxin karto shuruudaha lagu helo FSS, waa in lagaa qaadaa xayiraadda ku saaran. Haddii la taliyahaaga shaqo uu kaa qaadi waayo xayiraadda, waxaad xereysaa racfaan.

Maxaan sameeyaa haddii aan rabo (weydiisto)in aan galo FSS laakin la talliyaha shaqo i yiraahdo ma buuxin shuruudihii la rabay?

- La hadal horjoogaha la taliyahaaga shaqo.
- Waxaad xaq u leedahay in aad racfaan ka qaadatid go'aankaas. Fiiri bogga xogta ursursan, *Racfaan U Qaadashada DHS*.
- Wac isla markiiba kaaliye sharci.

***Xog Ururs**an oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.* *Ha isticmaalaan xogtan ururs**an haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta ururs**an, ama aad ku hesho habab kale.*

© 2022 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.